



Daraasada RTD ee Qiimaynta Nidaamka oo Dhan iyo Falanqaynta Sinaanta

RTD waa bixiyaha adeegga gaadiid-safarka ee dadweynaha ee aagga magaalada weyn ee Denver. Iyadoo ah jawaabta warcelinta ka imaatay macaamiisha ee ku aadan in qiimaha gaari-raaci uu qaali yahay oona lagu wareerayo, RTD waxay daahfurtay Daraasada Qiimaynta Nidaamka oo Dhan iyo Falanqaynta Sinaanta si ay uga dhigto qiimayaasha gaadiid raaci kuwo **loo siman yahay, la awoodi karo** oona **fudud**. Eeg isbeddelada ay RTD ku talinayso in lagu sameeyo qiimaheeda gaadiid raaca!

Talooyinka Daraasadda Qiimaha Gaadiid Raaca

Qaab-dhismeedka Cusub ee Qiimaha Gaadiid Raaca oo Dhameystiran

Qaab-dhismeedka qiimaha gaadiid raaca oo dhameystiran ee lagu taliyay **wuxuu hoos ugu dhigayaa** qiimaha gaadiid raaca dhammaan macaamiisha wuxuuna meesha ka saarayaa qiimaha gaadiid raaca ee gobollada.

QIIMAHAA GAADIID RAACA EE HADDA JIRA OO DHAMEYSTIRAN			QIIMAHAA GAADIID RAACA EE LASOO JEEDIYAY OO DHAMEYSTIRAN		
	Deegaanka	Gobolka	Garoonda Diyaaradda	Jaango'an (Deegaanka/Gobolka)	
3-Saac	\$3.00	\$5.25	\$10.50	\$2.75	\$10
Maalin	\$6.00		\$10.50	\$5.50	
Bil kasta	\$114		\$200	\$88	

- Safarka lagu tagayo ama lagaga imanayo Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Denver (iyadoo la adeegsanayo Leen ama Gaadhi ku socodka hawada) waxay ku kacaysaa \$10
- Dhammaan safarrada kale ee aagga adeegga RTD waxay ku kacayaan \$2.75 Marida 3-Saacadood ama \$5.50 Marida Halka Maalin
- Macaamiisha U Mara meesha si bille ah waxay u safri doonaan meal kasta, oo ay ku jirto aadida iyo ka imaanshaha garoonka diyaaradaha, ayagoo bixinayaan \$88

Qaab-dhismeedka Cusub ee Qiimo-dhimista Qiimaha Gaadiid Raaca

RTD waxay bixisaan qiimo dhimis loogu talagalay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 iyo ka weyn, shakhsiyadka naafada ah, dadka hela Medicare iyo shakhsiyadka dakhligoodu hooseeyo ("LiVE"). Qaab-dhismeedka qiimo-dhimista qiimaha ee lagu taliyay **wuxuu hoos u dhigayaa** qiimaha macaamiisha qiimo-dhimista wuxuuna **isku daraa dhammaan** qiimaha gaadiid raaca si dhammaan dadka waaweyn ee isticmaala qiimaha qiimo-dhimista ee gaadiid raaca ay u bixiyaan qiimo isku mid ah safar kasta.

	QIIMO-DHIMSIYADA QIIMAHAA GAADIID RAACA EE HADDA JIRA Da'aha 65+, shakhsiyadka naafada ah, dadka hela Medicare / qiimaha gaadiid raaca ee LiVE			QIIMO-DHIMSIYADA QIIMAHAA GAADIID RAACA EE LASOO JEEDIYAY
	Deegaanka	Gobolka	Garoonda Diyaaradda	Deegaanka, Gobolka iyo Garoonda Diyaaradda
3-Saac	\$1.50 / \$1.80	\$2.60 / \$3.15	\$10.50 / \$6.30	\$1.35
Maalin	\$3.00 / \$3.60		\$5.25 / \$6.30	\$2.70
Bil kasta	\$57 / \$68.40		\$99 / \$119.70	\$27



- Dadka waaweyn ee isticmaalaya qiimaha qiimo-dhimista leh ee gaadiid raaca waxay u safri karaan *meel kasta*, oo ay ku jirto garoonka diyaaradaha, ayagoo isticmaalayaan qiimaha Qiimo-dhimista leh ee gaadiid raaca
 - Marida 3-saac ah waxay ku kacaysaa \$1.35, Marida Maalinta ahna waxay ku kacaysaa \$2.70 (leh qiimo-dhimis ah 50% qiimaha gaadiid raaca oo Buuxa)
 - Marida Bisha kastaa ah waxeey ku kacaysaa \$27 (leh qiimo-dhimis ah 70% qiimaha gaadiid raaca oo Buuxa)

Balaadhinta Barnaamijka Qiima dhimista Ku Salaysan Dakhliga Ee LiVE

Macaamiil badan oo dakhligoodu yar yahay ayaa u qalmi doona qiimo dhimista dakhliga ku salaysan ee LiVE iyadoo la raacayo talada. Gaar ahaan, RTD waxay ku talinaysaa:

- Ka saarida shuruudaha hadda jira si loogu yeesho ciwaan gudaha xuduudaha RTD
- Kordhinta heerka dakhliga qoyska ee ku aadan xaq u lanaasha qiimo-dhimista LiVE. Sida ku cad talada cusub, Qoyska afarta ruux ka kooban waxay samayn karaan dakhli qoyseed gaaraya \$75,000 ama ka yar waxayna u qalmi karaan qiimo-dhimista LiVE

Macaamiisha Access-a-Ride waxay sidoo kale noqon doonaan kuwo u qalma qiimo dhimista LiVE ee kharashyada gaadiid raaca ee Live-a-Ride.

Barnaamijyada Dhalinyarada iyo Ardayda

Taladu waxay ka sii dhigaysaa dhex ku sii nagaadka mid ay awoodi karaan dhalinyarada iyo ardayda sidoo kale.

- Dhammaan carruurta da'doodu tahay 5 ama ka yar ayaa si bilaash ah u raacaya iyadoona uu la jiro qof weyn oo lacagta gaadiid raaca bixiya (xaddid ah 3 carruur qofkii weynba)
- Dhallinyarada da'doodu tahay 19 ama ka yar ayaa si bilaash ah ku raacayaan sida hoosta timaada barnaamijka tijaabada ah ee Kharashka Ebarka ah ee Gaadiid-raaca ee loogu talagalay dhalinyarada muddo hal sano
- Ardayda dhigata kulliyadaha bulshada ee ka qaybqaadanaya, dugsiyada farsamada ama kulliyadaha kale iyo jaamacadaha ee aan iska diiwaan gelin CollegePass waxay ugu qalmi doonaan ayagoo ka bixinaaya \$70 bil kastaa SemesterPass



Ma rabtaa in RTD ay talooyinkan ka dhigto kuwo rasmi ah?

Wadaag fikradahaaga adigoo iimayl usoo diraaya dani.mclean@rtd-denver.com ilaa Maayo 22, ama wax badan ka baro adigoo ka qayb galaya dhacdo ama booqanaya farefeedback.rtd-denver.com. **Adeegyada turjumaada iyo fasiraada ayaa la heli karaa marka la codsado.**